

HABRAACYADA DUGSI KA-ERYIDDA

MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA* KA DIB DUGSI KA-ERYIDDA ILMAHAAGA

Baroosharkan waa in la siiyaa qofka quseeya ardayga marka la joogo Kulanka Dib-u-eegidda Dhaqanka.

Baroosharkan wuxuu siinayaa macluumaadka soo socda ee ardayga iyo qofkooda quseeya:

- Waxa la sameeyo haddii aad wax cabasho ah ka qabto oo ku saabsan dugsi ka-eryidda ilmahaaga
- Maxaa dhacaya ka dib dugsi ka-eryidda markay hirgasho
- Halka laga helo wixii macluumaad dheeraad ah iyo taageero.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka dugsi ka eryidda, oo ay ka mid yihiin kaalimaha iyo masuuliyadaha, iyo waxaad ka fidi karto inay dhacaan ka-hor dugsi ka-eryidda, ka eeg

www.education.vic.gov.au/school/parents/behaviour/Pages/faqs.aspx

ILMAHAYGII WAA LAGA ERYEY DUGSIGA, MAXAY TAAS LA MACNO TAHAY?

Ka-eryidda dugsi waa habka si joogto ah looga saarayo ardayga dugsi uu hadda ku qoran yahay.

Dugsi ka-eryidda joogtada ah ee ardayga laga eryo dugsi uu hadda dhigto waa tallaabada ugu adag oo uu maamuluhu heli karo waana in la adeegsadaa keliya ka dib qaababka kale ee maaraynta dhaqanka ay dhaceen. Dhaqanka ardaygu waa inuu kaloo ahaadaa mid sidaas u baaxad weyn ayna tahay dariiqa keliya ee la heli karo.

Duruufaha qaarkood dugsi ka-eryiddu waxay noqon kartaa falka keliya ee habboon halkaas oo ardaygu u keeno halis weyn oo run ah ammaanka ardayda kale iyo shaqaalaha ama uu wax u dhimayo waxqabadka barnaamijyada waxbarasho ee dugsiuga.

Dugsi ka-eryidda waa inaan loo adeegsan sidii ciqaab loo samaynayo dhacdooyinka iska dabiiciga ah, sida hal mar kaftan ama khiyaano ah, taas oo aan u keenayn wax waxyeelo ah ardayda kale ama xubnaha bulshada dugsiuga.

MUXUU MAAMULUHU TIXGELIYEEY KA HOR GO'AANSIGA IN ILMAHAYGA DUGSIGA LAGA ERYO?

Ka hor intaan ardayga laga eryin dugsi, waa in maamuluhu hubiyaa:

- In ardaygu helay fursadda in la dhagaysto
- Wixii macluumaad ama dokumanti ah oo uu keeno ardaygu ama qofkooda quseeya (oo ay ka midka yihiin Kulanka Dib-u-eegidda Dhaqanka) in la tixgeliyey marka la samaynayo go'aanka dugsi ka-eryidda

- Wixii tallaabooyin kale ah oo lagu eegayo dhaqanka ardayga lagu eryayo oo la tixgeliyey.

MAXAY YIHIIN SABABAHA DUGSI KA-ERYIDDU? MAXAAN SAMAYN KARAA HADDII AAN U MALAYNAYO IN DHAQANKA ILMAHAYGU UUSAN MUDNAYN DUGSI KA-ERYID?

Dugsi ka-eryiddu waa ciqaab loo haysto arimaha dhaqanka xun. Ilmahaaga waa la eryi karaa, haddii isla markii uu dugsi dhiganayo ama ka socdaalayo ama u socdaalayo dugsi ama ku howlan yahay howl dugsiyeed dugsi ka baxsan (ay ka mid yihiin ka socdaalida ama u socdaalida howlaha), uu –

GALO MID KASTA EE DHAQANNADA SOO SOCDA AH:

- Uu u-dhaqmo hab sidii inuu qatar uu keenayo, ha ahaato mid dhab ah, ama mid la malaynayo, caafimadka, ammaanka ama ladnaanta cid kastaa;
- Uu keenayo waxyeello weyn ama burburka guriga;
- Uu isku dayo inuu galo ama si ogaal ah uga qaybgalo xadidda guriga;
- Uu yeesho, adeegsado ama iibsho ama si ula kac ah ugu caawiyo qof kale inuu yeesho, adeegsado ama iibsho walxo sharci darro ah ama hub ah.
- Uu ku fashilmo inuu ku dhaqmo tilmaamid qeexan oo macquul ah ee xubin shaqaale si uu ugu keeno qatar, ha ahaato mid dhab ah, ama mid la malaynayo ama mid lagu go'diyey, caafimadka, ammaanka ama ladnaanta qof kasta;

- Uu si joogto ah ugu jiro dhaqan uu ku caayayo, yasayo, hoos-u-dhigayo ama ku dulleynayo qof kale asagoo ku salaynaya da'da, naas-nuujinta; jinsiga; asalnimada; kala-dhantaalanka; howl shaqo-joojinta; howl galmo sharci ah; xaalladda guur; xaalladda waalidnimo; astaamaha jidheed; ictiqaadka siyaasadeed ama howleed; uurka; cunsurka; ictiqaadka diimeed ama howleed; nooca galmada; xiriirka qofka (ha ahaado qaraabo ama wax kale) la leeyahay qof kale kaas oo lagu aqoonsado tixraac mid ka mid ah astaamaha kore.
- Uu si joogto ah ugu dhaqmo dhaqan aan waxba tarayn taas oo soo dhexgasha ladnaanta, ammaanka ama fursadaha waxbarashada ee arday kale oo kasta.

IYO

In dhaqanka ilmahaagu uu yahay mid sidaas u baaxad weyn, taas oo la tixgelinayo baahida uu ilmahaagu u qabo inuu helo waxbarasho marka la barbar-dhigo baahida ilaalinta caafimaadka, ammaanka iyo ladnaanta ardayda kale iyo shaqaalaha dugsiga iyo baahid loo qabo in la ilaaliyo waxqabadka barnaamijka waxbarasho ee dugsiga; dugsi ka-eryiddana loo arkay dariiqa keliya ee la heli karo.

Dugsi kasta waxaa looga baahan yahay inuu leeyahay Nadaamka Howlgelinta Ardayda kaas oo dhigaya rajooyinka bulshada ee laga wada-qabo qaybaha howlgelinta ardayda, dhaqanka ixtiraamka, imaanshaha iyo falalka oo ah bar laga jaan-qaato sida uu dugsigaagu wax uga qabanayo duruufaha ardayga ee gaarka ah.

Waxaa kaloo laga yaabaa inaad jeceshahay inaad weydiisato koobiga Nadaamka Howlgelinta Ardayda (*Student Engagement Policy*) ama waxaad ka eegi kartaa website-kooda si aad u hesho. Qorshahaasi wuxuu qori doonaa rajooyinka dhaqaneed ee ka jira dugsigaaga wuxuuna bar tilmaameed waxtar badan u yahay si loo ogaado bal in rajooyinkaas la jebiyey.

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/engagepol.aspx

Waxaa muhiim ah in la xusuusto inaad codsan karto kulan aad la yeelato maamulaha mar kasta inta lagu jiro muddada dugsi ka-eryidda, xataa haddii dugsi ka-eryidda mar hore la hirgeliyey. Haddii aadan ku qanacsanayn in cabashadaada wax laga qabtay, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Xiriirka Bulshada oo laga helo xafiiska gobolka ee wasaaradda ama mid ka mid ah adeegyada kale ee taageerada kuwaas oo ku liis-garaysan dhammaadka dokumantigan.

WAA MAXAY DOKUMANTIYADA AY TAHAY IN DUGSIGU I-SIIYO?

Maamulaha waa inuu kugu ogaysiiyaa adiga iyo ilmahaaga go'aankooda 48 saacadood gudahooda gunaanadka Kulanka Dib-u-eegidda Dhaqanka.

Haddii maamuluhu go'aansado inuu dugsiga ka eryo ilmahaaga, waa in lagu siiyaa dokumantiyada soo socda:

- *Ogaysiinta Dugsi Ka-eryidda*
- *Koobiga Foomka Racfaanka dugsi ka-eryidda*
- Baroosharkan

MAXAA DHACAYA KA DIB DUGSI KA-ERYIDDA? HALKEE BUU ILMAHAYGU DUGSI U AADI DOONAA?

Xaaladda uu ardaygu ku jiro da'da dugsiga qasabka ah, maamuluhu, asagoo la tashanaya xafiiska gobolka, waa inuu hubiyaa in ilmahaaga lagu qoro dugsi kale oo diiwaangashan; ama lagu qoro haya'dda tababarka oo diiwaangashan; ama uu ka qaybgalo shaqo-helid sida ugu dhaqsaha badan. Qorshahan waa in lagala hadlaa layslana ogolaadaa Kulanka Dib-u-eegidda Dhaqanka.

Xaaladda uu ardaygu uusan gaarin da'da dugsiga qasabka ah, maamuluhu, asagoo la tashanaya xafiiska gobolka, wuxuu idiin siin karaa adiga iyo ilmahaaga macluumaad ku saabsan dugsiyada kale, haya'daha tababarka ee diiwaangashan iyo wakaaladaha shaqo-helidda kuwaas oo siin kara fursadaha habboon ilmahaaga.

Haddii ay dhacayso dib-u-dhac ku yimaada xagga u-gudbinta ilamahaaga waxbarasho ama tababar cusub, waa in dugsigu siiyaa ardayga shaqo-guri macno leh si uu u soo dhammaystiro ilaa gudbinta la hirgelinayo.

RACFAAN MA KA QAADAN KARAA DUGSI KA-ERYIDDA ILAMAHAYGA?

Amarka Wasiirka ee *Ministerial Order 625* kaas oo xukuma dugsi ka-eryidda wuxuu ardayda awood u siinayaa inay racfaan ka qaataan eryidooda.

Waxaad kaloo racfaan ka aadan kartaa adoo masalaya ilmahaaga maaddaama aad tixgelisey fikradda ilmahaaga aadna hubisey inaad matalayso danahooda sida ugu fican.

Racfaan ayaa laga soo gubbin karaa arimaha soo socda:

- Dugsigu ma raacin habraaca dugsi ka-eryidda
- Sababaha dugsi ka-eryidda waxaa loo arkay kuwo aan caddaalad ahayn
- Markii ardaygu leeyahay sooyaal arimo dhaqaneed, waxaa jiray soo-dhexgelid iyo xeeladihii la adeegsadey oo aan kaafi ahayn
- Duruufo kale oo jirey

Waa in lagu siiyaa foomka racfaanka marka aad hesho ogaysiinta rasmiga ah ee dugsi ka-eryidda ilmahaaga. Foomkaas waxaa loo baahan yahay in la soo buuxiyo loona soo diro dugsi ilmahaaga 10 maalmo dugsiyeed gudahooda haddii aad doonayso inaad racfaan ka qaadata. Waxaa lagu talinayaa inaad u raacdo ilmahaaga dugsi si loo hubiyo in la helay.

MAXAA DHACAY INTA LAGU JIRO RACFAANKA DUGSI KA-ERYIDDA?

Isla markii Foomka Racfaanka Dugsi ka-eryidda uu helo dugsi, waxaa loo gudbinayaa xafiska gobolka ee Wasaaradda si tallaabo uga qaadaan.

Agaasimaha Gobolka ayaa tixgelin doona racfaankaaga go'aana ka gaari doona in la ayido ama la baddelo go'aanka dugsi ka-eryidda ilmahaaga.

Ayadoo la tixgelinayo racfaankaaga, Agaasimaha Gobolku wuxuu magacaabi karaa Guddiga Dib-u-eegidda Dugsi Ka-eryidda (ERP) si ay dib ugu eegaan kayska gaar ahaaneed ee ilmahaaga.

Haddii ERP la magacaabo, kaalintoodu waa:

- Inay siiyaan fursad adiga iyo ilmahaaga lagu dhagaysto; iyo
- Inay u diyaariyaan warbixin Agaasimaha Gobolka si ay uga caawiyaan go'aan ka gaaridda in la ayido ama la baddelo go'aanka dugsi ka-eryidda ilmahaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habkan waxaad ka eegi kartaa qaybta Anshaxa Disciplinary Measures:

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/studengage.aspx

HADDII LA GUDBIYO RACFAAN, MAXUU SAMAYN DOONAA ILMAHAYGU INTA AAN SUGAYNO GO'AANKA KAMA DAMBAYSTA AH?

Dugsi ilmahaagu wuxuu sii wadayaa inuu hirgeliyo qorshaha u-gudbinta kaas oo lagu gaarey Kulankii Dib-u-eegidda Dhaqanka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Kulankii Dib-u-eegidda Dhaqanka ka eeg:

www.education.vic.gov.au/school/parents/behaviour/Pages/faqs.aspx

Kayska ardayga ee gaarey da'da dugsi qasabka ah, taas waxaa ka mid ah in dugsi siiyo ilmahaaga shaqo-guri habboon ilaa u-gudbinta waxbarasho kale, tababar ama fursad shaqo-helid la hirgelinayo, ama ilaa racfaanka dugsi ka-eryidda la go'aamin doono (hadba kii soo horumara).

Xaaladda uu ardaygu uusan gaarin da'da dugsi qasabka ah, maamuluhu, asagoo la tashanaya xafiska gobolka, wuxuu idiin siin karaa adiga iyo ilmahaaga macluumaad ku saabsan dugsiyada kale, haya'daha tababarka ee diiwaangashan iyo wakaaladaha shaqo-helidda kuwaas oo siin kara fursadaha habboon ilmahaaga.

Haddii aad dareeno qabto ku saabsan sida wax u socdaan ama loo hirgelinayo ama shaqo-guriga la siiyey ilmahaaga, waa inaad kala sii hadashaa maamulaha dugsi ilmahaaga ama xafiska gobolka.

MAXAA DHICI DOONA MARKII GO'AANKA LA QAATO?

Haddii go'aanka lagu gaaro in la ayido dugsi ka-eryidda ilmahaaga waxaa si af ah lagugu ogaysiinayaa 24ka saacadood gudahooda go'aanka la gaarey.

Haddii Agaasimaha Gobolku go'aansho in la ayido go'aanka maamulaha dugsi ka-eryidda ilmahaaga, waa in maamuluhu qaadaa tallaabooyinka soo socda:

KAYSKA UU ARDAYGU GAAREY DA'DA DUGSIGA QASABKA AH

- Inuu sii wado hirgelinta qorshaha u-gudbinta ardayga dugsi kale, haya'd tababar oo diiwaangashan, ama shaqo-helid
- Inuu sii wado inuu ardayga siiyo shaqo-guri ilaa inta loo gudbinayo dugsi kale, haya'd tababar oo diiwaangashan, ama shaqo-helid la dhammaystirayo.

KAYSKA UU ARDAYGU UUSAN GAARIN DA'DA DUGSIGA QASABKA AH

Maamuluhu waa inuu hubiyaa in ardayga iyo qofka quseeya in la siiyey macluumaad ku saabsan dugsiyada kale, haya'daha tababarka ee diiwaangashan ama shaqo-helidda kuwaas oo siin kara fursadaha habboon ilmahaaga.

Haddii Agaasimaha Gobolku go'aansho in la baddelo go'aanka maamulaha ee dugsi ka-eryidda ilmahaaga, waa in maamuluhu qaadaa tallaabooyinka soo socda sida ugu dhaqso badan:

- Ardayga waa in dib loogu qoraa dugsi
- Maamuluhu waa inuu ardayga u sameeyaa Qorshaha Ku-noqoshada Dugsi asagoo la kaashanaya ardayga, qofka quseeya, iyo macalimiintiisa.
- Diiwaanka dugsi ka-eryidda waa in laga tirtiraa diiwaanka joogtada ah ee ardayga iyo KAYSKA 21
- Ardayga iyo qofka quseeya waa in qoraal lagu ogaysiiyaa in dugsi ka-eryiddii laga saaray diiwaanka ardayga.

HALKEE BAAN KA DOONTAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH AMA TAAGEERO AH?

Student Engagement and Inclusion Guidance waxay qoraysaa habka uu maamuluhu ay tahay inuu raaco markii la hirgelinayo dugsi ka-eryidda. Waxaad tilmaamaha ka helaysaa halkan:

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/studengage.aspx

FAQs loogu talagalay Waalidiinta oo ku saabsan dugsi ka-joojinta ama dugsi ka-eryidda waxaa laga helaa:

www.education.vic.gov.au/school/parents/behaviour/Pages/faqs.aspx

Isla dhacdada kowaad waa inaad la xiriirtaa sarkaalka Xiriirka Bulshada oo laga helo xafiiska gobolka ee kuugu dhow (Faahfaahinta xiriirku hoos ka eeg)

XAFIISYO GOBOLEEDKA WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TARBIYADA CARRUURNIMADA HORE

NORTH EASTERN VICTORIA REGION

Email: nevr@edumail.vic.gov.au

Benalla

Boostada: PO Box 403, Benalla, Victoria 3672

Meesha: 150 Bridge Street East, Benalla,
Victoria 3672

Taleefanka: (03) 5761 2100

Fakiska: (03) 5762 5039

Glen Waverley

Meesha: Level 3, 295 Springvale Road,
Glen Waverley 3150, Victoria

Taleefanka: (03) 9265 2400

Fakiska: (03) 9265 2444

NORTH WESTERN VICTORIA REGION

Email: nwvr@edumail.vic.gov.au

Bendigo

Boostada: PO Box 442, Bendigo, Victoria 3552

Meesha: 7-15 McLaren Street, Bendigo,
Victoria 3550

Taleefanka: (03) 5440 3111

Fakiska: (03) 5442 5321

Coburg

Boostada: Locked Bag 2001, Coburg, VIC 3058

Meesha: Level 2, 189 Urquhart Street,
Coburg, VIC 3058

Taleefanka: (03) 9488 9488

Fakiska: (03) 9488 9400

SOUTH EASTERN VICTORIA REGION

Email: sevr@edumail.vic.gov.au

Dandenong

Boostada: PO Box 5, Dandenong 3175

Meesha: 165-169 Thomas Street, Dandenong 3175

Taleefanka: (03) 8765 5600

Fakiska: (03) 8765 5666

Moe

Boostada: PO Box 381, Moe, Victoria 3825

Meesha: Corner Kirk and Haigh Streets,
Moe, Victoria 3825

Taleefanka: (03) 5127 0400

Fakiska: (03) 5126 1933

SOUTH WESTERN VICTORIA REGION

Email: swvr@edumail.vic.gov.au

Ballarat

Meesha: 109 Armstrong Street North, Ballarat, 3350

Taleefanka: (03) 5337 8444

Fakiska: (03) 5333 2135

West Footscray

Meesha: Level 3, Whitten Oval, 417 Barkly Street,
West Footscray, 3012

*(waxaa laga soo galaa albaabada dhalada
ah oo is-fura)*

Taleefanka: (03) 9291 6500

Fakiska: (03) 9291 6565

Geelong

Boostada: PO Box 2086, Geelong, Victoria 3220

Meesha: 5A Little Ryrie Street, Geelong, Victoria 3220

Taleefanka: (03) 5225 1000

Fakiska: (03) 5225 1099

TAAGEERADA LA HELI KARO OO DHEERAAD AH

Parentline Victoria

Taleefanka: 13 22 89 – 8am to midnight 7 days a week

Parentline waxay adeegga la-talinta taleefanka ah siisaa Waalidiinta iyo daryeelayaasha haya carruurta da'doodu u dhaxayso dhalashada ilaa sided-iyo-toban sannadood.

Parents Victoria

Taleefanka: (03) 9380 2158 or 1800 032 023 (rural callers only)

Website-ka: www.parentsvictoria.asn.au

Victorian Aboriginal Education Association Inc.

Taleefanka: (03) 9416 3833

Website-ka: www.vaeai.org.au

Child and Adolescent Mental Health Services

Taleefanka: 1300 767 299

Website-ka: www.health.vic.gov.au/mentalhealth/services/child/

Children's Protection Society

Taleefanka: (03) 9450 0900

Website-ka: www.cps.org.au

Australian Childhood Foundation

Taleefanka: (03) 9874 3922

Website-ka: www.childhood.org.au/website/default.asp

Association of School Councils in Victoria

Taleefanka: (03) 9808 2499

Website-ka: www.asciv.org.au/ASCIV/Welcome.html

Victorian Council of School Organisations

Taleefanka: (03) 9429 5900

Website-ka: www.viccsso.org.au/

Victorian Multicultural Commission

Taleefanka: (03) 9208 3184

Website-ka: www.multicultural.vic.gov.au/